# Guudmarka iyo Tixgelinnada Laysan Siinta Daryeelka Carruurta Xilliga Dayrta 2020



Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska ee Gobolka Washington (DCYF) waxay dedejineysaa codsiyada cusub ee laysanka iyada oo lagaga jawaabayo cudurka faafa ee COVID-19 iyo sannad dugsiyeedka soo socda iyada oo la filayo in ay kororto baahida loo qabo xulashooyinka daryeelka carruurta da'da dugsiga ku jira. Dukumiintigan waxaa loogu talagalay inuu gacan ka geysto hagidda daryeel bixiyeyaasha cusub ee carruurta ee suuragalka ah ee tixgelinaya laysanka.

Iyada oo degmooyinka iskuulada Washington ay ku dhawaaqayaan qorshayaashooda sanadka soo socda ee 2020-2021, waalidiin badan ayay xujo ku noqotay rajada ay ka qabaan fasalo onleen ah oo loogu tala galay caruurtooda da'da iskuulka jirta. Yaa daryeeli doona carruurta, marka ay ku jiraan iyo marka ay ka baxaan saacadaha iskuulka onleenka ah labaduba? Tani waa su'aasha waaliddiin iyo daryeel bixiyayaal badan ay la harjadayaan haddadan. Bulshada bixiyaha laysanka laheed ee horay u jirtay ayaa wax qabad laheed iyo firfircooni tan iyo bilowgii cudurkan faafa; qaar badan ayaa furnaa oo u adeegayay carruurta bulshadooda. In kasta oo daryeel bixiyayaasha wali sii furnaayeen, waxaan aragnay hoos u dhac ku yimid tirada qoysaska doonaya inay carruurtooda u diraan daryeelka. Nasiib darro, tirada horay laysanka u haysatay suuragal ma noqon doonto inay ku filnaadaan baahida sii kordheysa ee daryeelka carruurta da'da dugsiga ku jira.

Waxaa laga yaabaa inaad ka fikirtay inaad u adeegto carruurta bulshadaada dhexdeeda ah ama adiga oo ka jawaab celinya baahiyaha soo ifbaxay dayrtan. Waa kuwaan qaar ka mid ah su'aalaha iyo tixgelinnada ka hor intaadan ruqsad u helin inaad bixiso daryeelka carruurta, ha ahaato furitaanka xarun, barnaamijka da' dugsiyeedka ama barnaamijka daryeelka carruurta ee guriga qoyska:

- **Baahi:** Bulshadaada dhexdeeda ma ku yar tahay xulashooyinka daryeelka carruurta? Miyaad la xiriirtay bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee deegaanka si aad wax uga ogaato awoodda deegaanka? Intaa waxaa sii dheer, waxaad awoodi kartaa inaad wax ka ogaato sahayda iyo baahida ka jirta deegaankaada adiga oo kala xiriiraya Child Care Aware ee WA khadka internetka ee **https://childcareawarewa.org**.
- **Boos:** Miyaad awood u leedahay inaad ka furato gurigaaga ama iibsato/kireyso xarun ballaaran oo lagu bixiyo daryeelka carruurta? **Qorsheyso inaad ka hesho Warqada Degidda (C of O) dowlada hoose ee deegaankaada**, taas oo looga baahan yahay laysanada daryeelka carruurta ee xarunta, da' dugsiyeedka iyo gargaarka degdegga ah. Inaad sii haysato C of O waxay ka dhigeysaa hannaanka laysan siinta mid degdeg u socda.
- **U Adeegida Carruurta Dakhliga Yar (Kabis):** kaliya barnaamijyada laysanka leh iyo "kuwa loo sharciyeeyay lacag bixinta kaliya" ayaa xaq u leh lacag kabista gobalka iyo federaalka. Tixgeli maalgalinta ay qaadan doonto iyo sidoo kale qaabab kala duwan oo loogu adeegi karo qoysaska dakhligooda uu hooseeyo iyada oo loo marayo deeqo waxbarasho, lacag aruurin ama kabitaan. Haddii aad qorsheyneyso inaad u adeegto carruurta laga yaabo inay xaq u yeeshaan inay helaan lacag kaabista, laysan la siiyo ama "kuwa loo sharciyeeyay lacag bixinta kaliya" ayaa loo baahan yahay. Ka eeg macluumaadka kabista bogga internetka ee Iskuxirrada Daryeelka Carruurta DCYF ee Shaqeenaya qaab **www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/getting-help/wccc**.
- **Laysan:** Ma u baahan tahay in laysan lagu siiyo? Jawaabta badanaa waa haa, balse way kala duwan tahay.

## Fahamka Noocyada Daryeelka Caruurta Reeban

Sida uu qabo RCW 43.216.010 (1): Qof kasta ama hay'ad kasta oo ku bixisa daryeelka caruurta iyo adeegyada waxbarashada hore meel ka baxsan guriga ilmaha waa in ay laysan siiso Waaxda Caruurta, dhalinyarada iyo Qoysaska ee Gobolka Washington (DCYF) si ay u bixiyaan daryeel hadii aan laga reebin.[1] Waxaa jiraa 13 waxyaabood oo laga reebay daryeelka carruurta ee sharciyeysan[2] sharci ahaan:

- Qaraabada qaarkood
- Mas'uuliyiinta sharciga ah
- Dadka dariska ama saaxiibada buuxiya shuruudaha qaarkood
- Waalidiinta ku jira qaabka isweydaarsiga
- Iskuulada xanaanada ee buuxiya shuruudo gaar ah
- Iskuulo
- Xeryaha muddo xilliyeedyada ee buuxiya shuruudaha qaarkood
- Daryeelka carruurta ee xarunta ee buuxiya shuruudaha qaarkood
- Barnaamijyada madadaalada ama waxbarashada ee deeganka ka baxsan ee buuxiya  shuruudo gaar ah
- Barnaamijyada ay maamulaan dawladaha deegaanka, gobolka ama federaalka
- Barnaamijyada leh keydadka dhulka qabaa'ilada federaalka aqoonsan tahay.
- Barnaamijyada leh keydadka dhulka militariga federaalka.
- Barnaamij bixiya waxbarashada hore iyo adeegyo taageero oo buuxiya shuruuda gaar ah

Hadii aad u maleyso in barnaamijkaada mid reeban yahay, fadlan la xiriir  **dcyf.welcome@dcyf.wa.gov** to find out for sure.

*Ogsoonoow: daryeel bixiyayaasha carruurta ee reeban ma adeegsan karaan lacag kabista daryeelka carruurta. Waqtigan, taasi waa isha kaliya maalgelinta ee laga helo DCYF ee lagu bixiyo daryeelka.*

**Haddii furista barnaamij laysan leh la rabo ama loo baahan yahay,** DCYF ayaa kaa caawin doonta inaad horay ugu dhaqaaqdo midkood laysan lix bilood degdega ah ama laysan buuxa, laysan aan dhaceynin, kuna saleysan baahiyaha.

## Waxaad diyaar u tahay inaad Horay Ugu Dhaqaaqdo Noqoshada Bixiye Laysan Leh. Maxay tahay inaad sameeyso?

1. Marka hore, haddii aad qorsheynayso inaad isticmaasho, kiraysato ama iibsato dhismo loogu talagalay barnaamij xarun ama da' iskuuleed, hubso inaadu heli karto C of O (Warqada Degidda) dhismaha. Ka eeg dowladda hoose ee degmadaada. C of O (Warqada Degidda) waxaa loogu baahan yahay si loogu helo laysanka daryeelka carruurta barnaamijyada xarunta ama da' iskuuleeyda. C of O (Warqada Degidda) loogama baahna barnaamijyada daryeelka ilmaha ee hoyga qoyska.
2. Si aad u hesho laysan siin joogta ah, hannaanka wuxuu ku bilaabmayaa tabbabar shaqo onleen ah, kaas oo lagu heli karo luuqadaha Ingiriis, Isbaanish iyo Somali: Tabbabarka hannaanka laysan siinta, tillaabada koowaad ee **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider/licensing-process**. Waxaad u baahan doontaa lambarka aqoonsiga STARS si aad u sameyso tabbabarka; ka dalbo nidaamka diiwaangelinta, MERIT khadka tooska ah ee **https://apps.dcyf.wa.gov/MERIT/Home/SignInRegister**. Kadib la xiriir **dcyf.welcome@dcyf.wa.gov** tillaabada xigta *Ogsoonoow: barnaamijyada da' iskuuleeyda waxay leeyihiin hannaan tabbabar gooni ah; iimayl**dcyf.welcome@dcyf.wa.gov** to learn more.*
3. Wixi ku saabsan laysanka lixda bilood ee degdegga ah, la xiriir**emergencychildcare@dcyf.wa.gov** or call 866-777-3293 si aad wax badan uga ogaatid. Marka hannaanka uu dhexda marayo, waxaa lagugu xiri doonaa shaqaalaha laysan bixinta ee DCYF kuwaas oo kaala shaqeynaya inaad buuxiso shuruudaha oo aad sameysid kormeer.
*Ogsoonoow: laysanada ayaa kaliya ku wanaagsan lix bilood; ka hor inta aysan lixda bilood dhicin waxaad u baahan doontaa inaad hesho laysan caadi ah ama aad xirto barnaamijkaaga.*

## Hadii aad Kolhoraba Tahay Bixiye Laysan Leh?

Waa kuwan qaar ka mid ah xulashooyin kale oo dheerad ah si looga caawiyo bixiyeyaasha cusub ama horeba laysan u lahaa inay si dhaqso leh ula qabsadaan ama u ballaarinayaan adeegyada daryeelka carruurta inta lagu jiro cudurka faafa ee COVID-19 iyo xaaladda degdegga ah:

- **Ka dhaafida iyo kala duwanaanshaha deg-degga ah ee daryeel bixiyayaasha carruuta ay ku ballaarinayaan awooda ama ku dhaafayaan qawaaniinta laysan siinta ee gaarka u ah caqabadaha ka dhashay COVID-19:** Daryeel bixiyaha waa inuu codsadaa kuwan, waxaana lagu bixiyaa qaab shaqsi ku saleysan. La xiriir laysan bixiyahaada si aad u biloowdo hannaankan. Ka raadi cafiiskaada daryeelka carruurta ee deegaankaada onleenka ee **www.dcyf.wa.gov/find-an-office/el-offices**.
- Daryeelka carruurta iyo laysannada degdegga ah[3] waa inay si dhakhso leh u aasaasaan barnaamijyada daryeelka carruurta ku meelgaar ah iyo waxbarashada hore, haddii ka dhaafida ama kala duwanaashadu aysan ahayn ikhtiyaar.

Booqo boggeena intarnetka ee Waxbarashada Hore iyo Daryeelka Carruurta ee DCYF ee **www.dcyf.wa.gov/coronavirus-covid-19/early-learning#general** si aad u akhrido Su'aalaha Inta badan laiska Weydiiyo Waxbarshada Hore iyo Goobaha Daryeelka Caruurta inta lagu guda jiro cudurka faafa ee COVID-19. Waxaa jira dhowr tabbabar onleen oo macluumaad xanbaarsan iyo ilo lagu dhajiyay dhinaca midig ee bogga intarnetka.

---

1. RCW 43.216.010(1). **https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=43.216.010**
2. RCW 43.216.010 (2). **https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=43.216.010**
3. Cutubka 110-310 WAC. **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/rules/Emergency.Child.Care.Licenses.pdf**

*Hadaad ku rabto nuqulada dukumiintigan qaab ama luqad kale, fadlan la xiriir Xiriirada Degmada ee DCYF (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*